



Tallaabooyinka iyo Borotokoolka BPS Fayriska Koronaha 2019 (COVID-19)

Waxyaabaha soo socdaa waa qaybaha muhiimka u ah u diyaar-garowgeena iyo qorsheynta laxiriirta cudurka COVID-19 oo had iyo jeer isbedelaya. Difaaca koowaad wuxuu ubaahanyahay xasillooni iyo dareen caam ah.

Saraakiisha Caafimaadka Maxaliga iyo kuwa Gobolka

Waxaan si dhow ula shaqeyneynaa dhamaan saraakiisha caafimaadka maxaliga ah iyo kuwa gobolka, iyo sidoo kale Waaxda Waxbarashada Gobolka New YORK (NYS).

Qorshooyinka Degdega ah ee Nabdoonaanta

- Dhammaan maamulayaasha iskuullada Waxaa si sanadla ah loogu tabobaraa Qorshaha Jawaab Celinta Degdeg ah ee ku salaysan Iskuulka iyo Degmada. Maamuleyaasha ayaa iyagana sidoo kale ku tababaray dhammaan shaqaalaha qorshayaashan.
- Waxaa loo baahan yahay in fasal kasta oo ka mid ah Degmada uu haysato dukumiinti Jawaab-celinta Degdeg ah ee Iskuulka loo yaqaana 'red folder' si loo isticmaalo dhammaan xaaladaha degdegga ah, oo ay kujiraan xaaladaha degdegga ee la xiriira caafimaadka.

Borotokoolka Soo Sheegista Maqnaanshaha/Jirrada

- Kalkaaliyaasheena caafimaad iskuulka ayaa jaantuus ku muujinaya kiisaska hargabka oo kale ah oo ay arkaan, waxay diiwan gelin doonaan calaamadaha, waxayna soo jeedin doonaan talooyin si ardayga uu guriga ugu laabto ama u booqdo takhtarka, ayagoo maskaxdana ku haaya inay raacaan shuruucda HIPPA iyo FERPA.
 - Dadka aan caafimaad dareemin waxaa si xoogan loogu dhiirigelinayaa inay gurigooda joogaan.
 - Waaxda Caafimaadka ee Degaanka Erie waxay ku talineysaa waxyaabaha soo socda: Shakhsiyaadka la soo gudboonaada astaamaha xanuunka lagana yaabo inay u safreen meelaha laga walaacsan yahay, ama xiriir la yeesheen qof u safray goobahaas, waa **inay sii wacaan** dhakhtarkooda caafimaadka **intaysan** shaqsi ahaan u aadin ee u raadsan daawaynta.

Barotokoolka Nadiifinta & Jeermis baabi'inta

- Aaladaha derbiga ee jeermis dilaha gacmaha lagu nadiifiyo ee dhammaan fasallada dhexdooda ku xiran iyo meelaha dadka ay wadaagaan, ayaa mar walba la buuxin doona.

- Jeermis-dileyaasha loo yaqaano "Broad Spectrum" oo leh awood 48 saacadood ay wax ku dilaan ayaa la soo dhigi doona iyagoo xirmo xirmo ah, iskuuladana waxaa si aad ah loo nadiifin doonaa todobaadkii laba jeer.
- Tirtireyaasha waraaqaha jeermis baabi'iyaha leh oo ay ku jirto (.5% peroxide) ayaa loo soo dhigi doonaa macallimiinta iyo fasallada, iyo xafiisyada fog.
- Dhammaan musqulaha waxay lahaan doonaan biyo kulul oo socda iyo saabuun ku filan.
- Waxaanu dalabnay saad qalab ee ku filan sannad dugsiyeedka oo idil.

Borotokoolka Adeegga Cunnada

- Farsamooyinka badbaadada leh ee Adeegga Cuntada iyo nadaafadda heer dugsiyeedka iyo maqaayada ayaa lagu sii adeegsan doonaa heerarka ugu adag.
- Shaqaalaha Adeegga Cuntada ee xanuunsanaya waa inaysan soo shaqo tegin.

Barotokoolka Gaadiidka Iskuulka

- Labada Shirkadaha "First Student Inc., iyo NFTA waxay kor u qaadeen borotokoollada nadaafadda si loo yareeyo ku faafidda jeermisyada dusha sare ee la taabto basaskooda.

Borotokoolka kala dirista Ardayda iyo Xiritaanka Iskuulka

- Waxaan si dhow ula shaqeyn doonaa Waaxda Waxbarashada Gobolka iyo Waaxda Caafimaadka ee Degaanka Erie si loo helo hagitaan goorta iyo haddii ay ku habboonaan doonto kala dirista dugsiiga ama in la xiro, goor hore ayaan idin sii ogeysiin doona.
- Kooxdeena Farsamada Macluumaadka waxay la shaqeyneysaa Kooxda Manhajkeena iyo Waxbarista si loo diyaariyo qorshayaal badan oo lagu bixinaayo kheyraad waxbarasho haddii ay dhacdo in iskuulada la xiro oo ay ka mid yihiin barashada ilaha elektarooniga ah iyo qalabka casharada oo guriga loo qaato.

Borotokoolka Safarada Gaarka ah iyo kuwa Shaqada la Xiriira

- Shaqaaluhu waxay soo gudbin doonaan wax kasta iyo codsiyada iyo macluumaadka ku saabsan safarka ardayda iyo qoysaska (safarada gaagaaban (field trips), ilaa safarka gu'ga, iyo safarka shirarka loo aado).
- Kormeeraha guud ayaa go'aan ka gaari doona in la kansalo ama dib loo dhigo safarada iskuulka iyo kan degmada iyadoo la raacayo tilmaamaha saraakiisha caafimaadka si daqiiqad-daqiiqad ah.
- Ogeysiinta waxaa lala wadaagi doonaa Saraakiisha Caafimaadka si loo qiimeeyo loona go'aamiyo daruuriga iyo / ama amniga safarka iyo / ama suurtagalnimada (14-maalmood) karantiil ah marka la soo laabto.

Borotokoolka Isgaarsiinta

- Waxaanu siin doonaa xog cusbooneysiin toddobaadle ah, qoysaska, shaqaalaha iyo bulshada anagoo adeegsanayna habab kala duwan sida websaydhka degmada, fariimo cod ah, emayl ahaan, waraaqo diyaarsan, iyo qoraallo.
- Waxaan si ballaaran u wadaagi doonaa macluumaadka iyo talooyinka waqtiga ku habboon ee naga soo gaaraan xirfadleyda caafimaadka iyo hay'adaha la xiriira.
- Waxaa jiri doona cusboonaysiin joogto ah oo aan ka helno Adeegyada Taageerada Ardayda ilaa Maamuleyaasha dhismaha iskuulka.